Somali
Vaccination to protect against HPV
Information for parents and people eligible for catch-up HPV vaccination

# Talaallada ka hortagaaya HPV

Xog loogu talagalay waalidiinta iyo dadka u qalma talaalka kahortaga HPV

## Xog ku saabsan Barnaamijka Ka dabataga ah ee Talaalka HPV ee Laura Brennan HPV

Bisha Diseembar 2022, Wasaarada Caafimaadka ayaa shaacisay barnaamijka talaalka HPV oo ka dabatag ah. Barnaamijka waxaa loogu magac daray si loogu xasuusto Laura Brennan taasoo si hagar la'aan ah ugu ol-oleysay talaalka HPV kahor intii aysan u dhiman Kansarka Minka bishii Maarso 2019. HSE ayaa bixinaysa fursad **halmar ah** oo la siinaayo dadka u qalma si ay u qaataan talaalka HPV ee kadabatag ah. Talaalku waa mid amaan ah, shaqeynaaya oo bilaash ah. Waxaa la heli karaa keliya ilaa dhammaadka 2023.

## Xog ku saabsan Waraaqdaan tilmaamaha

Xaashidaan xogta waxaa loogu talagalay waalidiinta, ardayda, iyo dadka u qalma inay qaataan talaalka kahortaga HPV. Waxaan filaynaa in waalidiinta iyo ardaydu ay isla akhriyaan.
Kooxda talaalka ee HSE ayaa talaallada ka dabataga ah ee HPV sii doona:

- Ardayda hoose ee wali ku jira dugsiga sare – hablo iyo wiilalba – kuwaasoo aan horey u qaadan talaalka HPV:
  - › Ardayda dumarka ah ee ku jira sanadka 2aad - 6aad ee dugsiga sare, dugsiga guriga ama dugsiga gaarka ah
  - › Ardayda ragga ah ee ku jira sanadka 2aad - 6aad ee dugsiga sare, dugsiga guriga ama dugsiga gaarka ah

- Dhammaan dumarka katagay waxbarashada heerka labaad kana yar 25 sano jir maalinta talaalka, marka la xaqiijiyo inaysan horey u qaadan talaalka

- Dhammaan ragga katagay waxbarashada heerka labaad kana yar 22 sano jir maalinta talaalka, marka la xaqiijiyo inaysan horey u qaadan talaalka.

**(Fiiro gaar ah: Ardayda shisheeye ee dumarka ah ee aan talaalka qaadan kana yar 25 sano iyo ardayda ragga ah ee shisheeye ee aan qaadan talaalka kuwaasoo kayar 22 sano jir si caadi ahna u dagan* Ireland si ay u helaan adeegyada caafimaadka ayaa sidoo kale u qalma talaalka HPV ee lagu baxsho barnaamijka kadabataga ah).**

- Qaxootiyaasha iyo Codsadeyaasha Magangalyada ka Dalbanaaya Ireland kuwaasoo jinsi ahaan iyo da' ahaanba u dhigma kooxaha kor lagu sheegay ayaa sidoo kale u qalma talaalka ka dabataga ah ee lagu baxsho barnaamijka Talaalka Ka Dabataga ah ee HPV ee Laura Brennan – marka la xaqiijiyo inaysan marhoreba helin talaalka HPV.

*Waxaad tahay qof caadi u dagan haddii aad ku noolayd Ireland ugu yaraan sanad ama aad dooneyso inaad halkaan ku noolaato ugu yaraan hal sano. Si aad u hesho xog dheeri ah fadlan booqo Citizens Information (Xogta Muwaadiniinta) oo aad ka helayso https://www.citizensinformation.ie/en/health/health-system/entitlement-to-public-health-services/

Dadka u qalma talaalka HPV waxaa la siin doonaa:
**Hal kuurada talaalka ah** haddii ay leeyihiin nidaamka difaaca jirka oo caafimaad leh ama
**Sadex kuurooyinka talaalka ah** haddii nidaamkooda difaaca jirku liito (ay qabaan nidaamka difaaca jirka oo liita).

Haddii cunugaagu 15 sano jiro ama ka yar yahay waxaan u baahan nahay waalidiinta iyo masuuliyiintu inay akhriyaan xogtaan ayna bixiyaan ogolaansho si ay u muujiyaan inay aqbalayaan in cunugoodu qaato talaalkaan.

Dadka jira 16 sano ama ka wayn ayaa iskood u ogolaan kara talaalka. Haddii aad jirto inta u dhexaysa 16 iyo 24 sano, waxaan u baahan nahay in dadku akhriyaan xogtaan ayna ogolaadaan si ay u muujiyaan inay aqbalayaan qaadashada talaalka.

Waraaqdaan xogtu waxay kaaga waramaysaa:
- Talaalka HPV - waxa uu kaa difaacaayo iyo kuurooyinka loo baahan yahay

- Booqashooyinka kooxda talaalka
- Su'aalaha guud
- Meesha aad ka helayso xog dheeraad ah
- ogolaansho

Haddii aad qabto su'aalo ka qabto qayb kasta oo kamid ah waraaqdaan xogta, fadlan la xariir xubin kamid ah kooxda talaalka. Waxaad xogta xariirka ka helaysaa barta www.hpv.ie

## *Talaalka HPV*

### *Talaalku waa walax ku siinaysa difaac (gaashaan) ka dhan ah cudur gaar ah. Talaalka HPV wuxuu ka hortagaa fayraska HPV kaasoo keeni kara kansar.*

### *Qaadashada talaalka*

Kooxaha talaalka ee HSE ayaa ku bixin doona talaalka HPV dugsiga ama xarunta talaalka. Dadka intooda badan waxay qaadan doonaan 1 kuuro oo talaalka HPV ah si ay u helaan difaac. Dadka nidaamkooda difaaca jirku liito (leh nidaam difaac oo daciif ah), 3 kuuro oo talaalka HPV ah ayay u baahan yihiin.

- Kuurada 1
- Kuurada 2 waxaa la siin doonaa 2 bilood kadib
- Kuurada 3 waxaa la siin doonaa 6 bilood kadib (tusaale, 4 bilood kadib kuurada 2)

Haddii aad dhamaysay dugsiga waxaa lagugu casuumi doonaa inaad talaalka ka qaadato xarunta HSE. Hal talaal ayaa lagu dhuftaa garabka.

# Talaalka HPV - xog dheeraad ah

### *Waa maxay HPV?*

HPV waxay u taagan tahay 'human papillomavirus', kaasoo ah koox fayrasyo ah oo ka badan 100. Fayraska HPV ayaa aad u badan; inta badan dadka waxaa ku dhaca nooc kamid ah HPV intay nool yihiin. Waxaad ka qaadi kartaa fayraska HPV inaad galmo la samayso qof horay u qabay fayraska. Inta badan caabuqyada HPV iskood ayay u baxaan umana baahna daawayn. Hase yeeshee, dadka qaar, caabuqa HPV ayaa ku raagi kara kadibna keeni kara kansar. HPV ayaa sidoo kale keena xanuunka isnadaamiiska xubnaha taranka.

Talaalka HPV ayaa ka hortaga kansarka minka iyo kansarada kale.
Talaalka HPV waxaa loo yaqaanaa Gardasil 9.

### *Maxaa talaalka HPV loo siiyaa labadaba hablaha iyo ragga?*

Talaalka HPV ayaa la siinaayay hablaha ku jira sanadka koobaad ee dugsiga sare lagasoo bilaabo 2010. Tan waxaa sabab u ah in kansarka ugu badan ee uu HPV keeno uu yahay kansarka minka – kansar ku dhaca afka hore ee minka. Hase yeeshee, fayraska HPV ayaa keeni kara kansaro kale iyo xanuunno saamayn kara wiilasha iyo ragga, iyo lagasoo bilaabo Sibteembar 2019, wiilasha ayaa sidoo kale la siinaayay talaalka HPV.

Caabuqyada HPV ayaan iskood iskaga tagin, waxay sababi karaa noocyo gaar ah oo kansarka ah inay abuurmaan. Ragga, xanuunadaan waxaa kmid ah:

- Kansarka Oropharyngeal (kansarada afka iyo dhuunta)
- Kansarka guska
- Kansarka dabada

Hadba inta la kordhiyo da'yarta qaadanaysa talaalka – wiilasha iyo hablahaba – ayay sii yaraanaysaa faafida caabuqu.

### *Wadamadee baxsha talaalka HPV?*

In ka badan 140 wadan iyo deegaan ayaa hadda baxsha talaalka HPV oo qayb ka ah jadwalka qaran ee talaalka, ayadoo in ka badan 50 kamid ah wadamadaan ay siiyaan talaalka hablaha iyo wiilashaba. Wadamadaan waxaa ku jira:

- Australia

- New Zealand
- Norway
- Boqortooyada Ingiriiska
- Maraykanka

Waxaa jira xog badan oo ku saabsan guulaha laga gaaray barnaamijyadaan oo aad ka helayso www.hpv.ie

***Talaalkaan ka dabataga ah ee HPV ayaa la siiyaa wiilasha, hablaha, ragga waawayn ee da'da 22 sano iyo dumarka waawayn ee da'da ilaa 25 sano.***

***Talaalka HPV waxaa laga baxshaa in ka badan 140 wadan si looga hortago kansarka.***

### Waa maxay kansarada uu HPV keeno?

HPV ayaa keeni kara noocyada kaladuwan ee kansarada – unugyo jiran – oo ku dhaca ragga iyo dumarka labadaba. Ku dhawaad 10 kamid ah 10 kansarada minka ku dhaca waxaa sababa HPV.
Noocyada khatarta badan ee HPV ayaa sidoo kale sababi kara ku dhawaad:
- 5 kamid ah 10 kii kansar ku dhaca qarka xubinta taranka haweenka
- 6 kamid ah 10 kii kansar ee afka iyo dhuunta (kansarada hunguriga)
- ku dhawaad 7 kamid ah 10 kii kansar oo ku dhaca xubinta taranka hablaha
- 9 kamid ah 10 kii kansar oo ku dhaca dabada
- ku dhawaad 4 kamid ah 10 kii kansar oo ku dhaca guska

***In ka badan 550,000 oo arday oo ku nool Ireland iyo 100 milyan oo qof oo ku nool aduunyada oo dhan ayaa qaatay talaalka HPV.***

***HPV ayaa keena 1 kamid ah 20 kansar oo ka dhaca aduunyada.***

### Meeqa kuuro oo talaalka HPV ah ayaa loo baahan yahay?

National Immunisation Advisory Committee (NIAC, Gudigga Qaran ee Talo Bixinta Talaalka) ayaa soo saaray talo cusub oo ku saabsan tirada kuurooyinka talaalka HPV ee loo baahan yahay.
NIAC ayaa hadda ku talinaaya:
- **Hal kuuro** oo **talaalka HPV** ayaa la siinayaa dadka jira 9-24 sano
- **Labo kuuro** oo **talaalka HPV ah** ayaa la siinayaa dadka ka wayn 25 sano
- **Sadex kuuro** oo **talaalka HPV ah** ayaa la siinayaa dadka **difaacooda jirku liito** (tusaale, qaba nidaamka difaaca jirka oo liita)

Sanadka koobaad ee dugsiga sare (ama sida ugu dhakhsaha badan) ayaa ah waqtiga ugu haboon talaalka, maadaama uu ugu haboon yahay ilmaha da'daan ku jira.

## Su'aalaha Guud

### Ardayda sanadka koobaad ee dugsiga sare ma go'aansan karaan inay sugaan ayna qaataan talaalka HPV xili danbe asagoo qayb ka ah barnaamijka talaalka dabagalka ah?

Ardayda hadda ku jira sanadka koobaad ee dugsiga sare ayaa loo yaboohay talaalka HPV sanadkaan taasoo qayb ka ah barnaamijka talaalka dugsiga ee joogtada ah.
Ardaydaan ayaan la siin doonin talaalka la qabsiga ah ee HPV mar danbe.
Haddii aad doorato inaad sugto ilaa cunugaagu ka waynaanaayo si uu u qaato talaalka, waxaad u baahan doontaa in cunugaaga uu talaalo dhakhtarkaaga guud (dhakhtarka qoyska) waxaadna u baahan doontaa inaad bixiso qarashka maamulka iyo talaallada.
Barnaamijka Talaalka HPV ee ka Dabataga ah ee Laura Brennan waa fursad halmar ah oo ay helayaan dumarka iyo ragga ilaa da' gaar ah uwaasoo aan horey u qaadan talaalka HPV inay hadda qaataan.

### Ma jiraa waqti loo cayimay yaboohaan?

Haa. Yabooha ayaa furnaan doona ilaa dhammaadka 2023.

## Dadka horey u qaatay talaalka HPV2 (Cervarix) ama HPV4 (Gardasil 4), hadda ma qadan karaan talaalka HPV9 ee lagu bixinaayo barnaamijka dabagalka ah?

Maya, haddii aad qaatay talaalka HPV2 ama HPV4 xili hore uma baahnid in dib laguugu talaallo talaalka HPV9 hadda.

## Miyaan heli doonaa diiwaanka talaallada ma baxshay?

Haa. Maalinta talaalka, cadaynta talaalka ayay cusboonaysiin doonaa kooxda talaalka ee dugsigu. Haddii aadan haysan cadayn talaal, xubin kamid ah kooxda talaalka ayaa ku siin doonta mid kadib talaalka.

## Sidee ayay ardaydu/anigu ugu diyaar garoobayaa maalinta talaalka?

Maalinta talaalka, ardaydu waa inay:
- Quraac cunaa
- Waa inay xidhaan shaar dabacsan oo gacmo gaab ah

## Sidee ayaan ku ogaanaynaa in talaalladu yihiin kuwo amaan ah?

Dhammaan talaallada ayaa ah kuwo amaan ah waxaana la xaqiijiyay inay naf badbaadinayaan ayna ka hortagaan xanuunka. Talaallada ayaa si adag loola soconayaa waxaana si joogto ah u qiimeeya ururo caalami ah oo ay ku jiraan:
- World Health Organization (Ururka Caafimaadka Aduunka)
- European Medicines Agency (Wakaalada Daawooyinka ee Yurub)
- Centers for Disease Control and Prevention (Hay'ada Xakameynta iyo Kahortagga Xanuunada) ee Maraykanka

Dhammaan ururada caalamiga ah ayaa soo sheegay in talaallada laga isticmaalo Ireland ay yihiin kuwo badqab leh aana lahayn cilado kale oo la ogyahay.

## Talaalka HPV ma leeyahay cilado muddo kooban soconaaya?

Inta badan dadku ma dareemaan wax cilad ah kadib talaalka HPV. Dadka qaar ayaa yeelan kara xanuunka, bararka iyo gaduudashada gacanta meesha cirbada looga muday. Dadka qaar ayaa dareemi kara madax xanuun, calool xanuun ama heerkulkoodu kici karaa. Xanuunkaan ayaa caadiyan ka ba'aaya kadib maalin ama labo.

## Talaalka HPV ma leeyahay cilado muddo dheer soconaaya?

Ma jiraan ciladaha mudada dheer oo la hayo oo ka dhasha talaalka HPV.

## Dadku ma u baahan yihiin inay maraan baaritaanka minka xataa haddii horey loo talaalay?

Haa. Inkastoo talaalka HPV uu kahortago inta badan kansarada minka, kama hortagaayo dhammaan kansarada. Marka waa muhiim in haweenka iyo dadka leh cervix ay maraan baaritaanka HPV ee minka mar kasta oo loogu yeero. Baaritaanka minka ee HPV bilaash ayay ku helaan dadka jira 25--65 sano. Waxaad xog dheeraad ah ka akhrin kartaa hse.ie/cervicalcheck

## Maxaan u baahan nahay inaan keeno haddii aan talaalka ka qaadanaayo xarunta HSE?

Haddii lagugu talaalaayo xarunta talaalka waa inaad keentaa aqoonsigaaga muujinaaya taariikhda Dhalashada iyo sawirkaaga. Aqoonsiga ayaa noqon kara baasaboor ama ruqsadaada darawalka.

## Meesha aad ka helayso xog dheeraad ah

Haddii aad qabto su'aalo, fadlan kala hadal xubin kamid ah kooxdaada talaalka ee HSE, kalkaalisadaada Caafimaadka Dadwaynaha ama dhakhtarkaaga GP ga (dhakhtarka qoyska). Waxaad booqan kartaa www.hpv.ie iyo www.immunisation.ie si aad u hesho muuqaallo iyo xaashiyaha xogta ee ku saabsan talaallada.

Somali

Vaccination to protect against HPV

Information for parents and people eligible for catch-up HPV vaccination

Waxaad sidoo kale heli kartaa lifaaqyada aad ka helayso waraaqaha xogta ee bukaanka oo ka hadlaaya talaallada barta www.hpra.ie. Ka raadi Gardasil 9 (HPV) si aad u akhrido waraaqda xogta bukaanka ee talaalada qusaysa.